5 -YIBIR

Cali Mudiir Maanta waa khamiis taariikhdu waa 15, waana 1984kii maantay sida caadadu noo ahayd waxaa laga doodihii looga sheekaysan jiray, dhaqannada Soomaaliyeed iyo caadaadka; dabcan ummad waliba waxay leedehay dhaqan iyo caado iyo waxyaalo ay iska soo soo gaartay oo caruurba aabayaalkeeda ay ka dhaxleen aabayaalkuna awooweyaalku ay ka dhaxleen.

Haddaba maanta waxaynu ka hadlaynaa duulka loo yaqaano “samya-qaate”, samaya qaate ayaanu ka hadlaynaa, faahfaahinteeda iyo sey u isticmaalaan iyo sey u isticmaalaan iyo dadkey yihiin iyo waxay yihiin; bal Xaaji Fiqiburaale haka hadlo waa mahadsantahay.

Fiqi Haye Cali waa mahadsantahay aad, horta ummad kastaa oo meel degtaa qolo kastaaba ha ahaatee sida aad u sheegtay dhaqan iyo caadooyin u gaara ayaa jira kuwaasoo dadna ku isticmaalo ay shaqadooduba tahay, dadna uu wax siiyo oo loo aqoonsanyahay; Haddaba haddii aan ka soo qaadno, nimanka kan ee samayaha qaata, waxaa weeye wejiyo kala duduwan bey leeyihiin oo shaqadooda ku saabsan, kuwaasoo waddan Soomaalida markaynu gaar ahaan u soo qaadano goballaddiisa kala duduwan, mid waliba dhaqan gooniyah oo ku saabsaan nimankaas samanyaha qaata ayey wax u siiyaan. Markaynu markaas eegno dad wuxuu yiraahdaa samanyaha kanu wuxuu ku soo sinaadeen illaa semnkii Bocor-Bacayr, waxaa dadka qaarkii qabi jiray nimankan samanyaha qaata marka wadkoodu uu dhowyahay meeshaas ay joogaan kumaba dhintaane meel la yiraahdo, “Xanfaley” buur la yiraahdo oo waqooyigaas Ceergaabo ka sokeysa, ayey tagaan oo halkaasay ku dhintaan baaba la yiraahdaa oo dad oran jiray, laakiin taasu waa waxaan jirin, ee nin waliba meeshuu malukul mowdkiisa ku galo ayuu ku dhintaa un, haddaba aynu u soo noqonno; nimankanu maxay sameeyaan samanyooy maxaa tahay? Maxay nimankaanu qaataan? Caynkee bay waqooyi iyo koonfur ku kala yihiin? Bal ayny taas siibal ballaarino.

Horta marka waqooyi la yiraahdo, samanyo marka la yiraahdo usha la qaato dadku wuxuu moodaa in magaca kan la yiraahdo, laakiin samayo; waxay ka soo jeeddaa ushaas ay qaataan, oo yiraahdaan ku burudi!, ku buruudi!, marka ku buruudidaas waxaa weeye calaamad ay sameeyaan, waxyaalo farabadn oo aad la yaabto ayey sameeyaan ushaas samayada ah ee ay sitaan oo ay isku xiran tahay usha iyo samanyihii la siinaayey magaca isku xiranyahay ayey farta saraan, mar faryarada bidix bey ka bilaabaan, marna taa waxay ka bilaabaan ee suulka ah. Marka afartaa farood ku dhameeyaan ayey calaacasha ku soo celiyaan illaa qarqarka ayey timaaddaa, dib bey u noqotaa, laakiin waa xeel ay yaqaaniin, oo xeelad ay yaqaaniinoo dadka argigixiso ku ridaysa weeye. Waa kow, dadkuna wuxuu qabaa haddii aadan wax siin ilmaha aad dhashay waa dhimanayaan oo waxbow u dhinmaaya, kamana wada qaataan oo waxaa weeye wiilka la dhalo oo Ilaahay laba qofoo is guursatay dhexdooda ka uumo ayey ka qaataan wax. Waagii Bucur-Bacayr ay saas ahaydna waxaa la leeyahay ee Aw-Barkhadle ayey iska horyimaadeen, waxaa uu yiri Bucur Baaceyr cashaan Aw-Barkhadlow - ...waa Yuusul Kawnayne ama halkaa ka dus ama halkaas ka soo noqo, ama badda gudub ama soo celi, wax walba ayuu... .. .. wuxuu yiri bal adigu samee marka adigu arimihiisii markuu ka yaabay aakhirkii “khud yaa arlu laahi” yaa la yiri

Dabadeed inamadii uu dhalay ee uu ka tegay yaa waxaa la yiri ‘ee maxaa la idiin siiyaa?’ ma wax aan weligii iidinka dhamman ayaa la idiin siyaa mise haddaa aabihiin magtiisii la idiin siiyaa, “waxaa weligayaga..., inkastoo laba weji dadku u yeelo laakiin anigu kan aan u maqlay waxaa weeye; waxaan weligey naga dhamman yaanu dooneynaa in aad na siiso” oo taasaa loo xukumay aan aniga sheekada aan qabo ay tahay. Oo maxay tahay naagta la guursado, naagta la guursado ee gabadha ah ee uurka yeelata ee wiilka dhasha qarshi ka qaadata ama rubiyad ka qaata, wax kaloo aad ku dari kartaan ma jiro. Wey korosadeenoo hadda arintii wey dhaafeen oo rubiyaddiina ma jirto, qarshingiina ma jiro ee wax xoog leh ayey qaattaan. Dadkuna wuxuu qabaa haweenka gaar ahaan haddii ninkaas samanyahaas aan la siin ilmahooda in ay wax gaarayaan, ayey qabaan. Waxayna sameeyaan bahal la yiraahdo “makaraan”, makaraankaasu cashaan iyaga qasdigooda waxaa weeye wax dhibaato ah oo inankaa dhashay ku dhacaaya ma jiraan oo karaaya; oo makaraanku sidaasuu ka dhigan yahay macnihiisu. Waxaana weeye laba qori oo yaryar oo la isla ekeysiiyo oo markaas idiin u yeelaanoo laba lakab ah, labadaas lakab bey markaas dhinaca isu saaraan markaasay gurigana ay dhigaan oo guriga markey dhigaayaan dadkale uma jeedaanee waxay leeyyihiin ninkii kale ee yimaada tusa kaas inaanu ka qaadanay yuusan mar labaad wax idiinka qaadanine. Cidna ilmahaaba lagu xiraayoo gacanta halkaa calaashaan calaacasha iyo dhudhunka iska galaan yaa lagu xiraa, qoortana waa lagu xiraa sidii qardhaaseed, nimankaasy sidaasay wax u qaataan. Nimankaan kalee koonfur joogaa iyagu geed ma gooyaan kuwaan arkay aniga uun, waxayna ka soo bilaabataa ilaa ceelkaas Jowhar ilaa inta tan u dhaxeysa Banaadir uun, yaan anigu uun kuwaan ku arkay yihiin. Markan waxaa jira dad la shaqaysta labada geesoodba oo naagta hebla la yiraahdo wixii uur leh noo soo sheegay yiraahdaan. Naagtii la aroosana noo soo sheegay yiraahdaan; arooska iyo ilmaha dhashay ee wiilka ah labada geesoodba wey ka qaataan, koonfurina wey ka qaataan, waqooyina wuu ka qaataa. Laakiin waxaa jira xeeladooda waqooyi iyo koonfurba dadkaa iyaga ihi dad u basaasa oo u badan xagga haweenka islaamaha waaweyn oo waxay yiraahdaan hebla iyo heblaa is guursanaaya oo waa ogsoonyihiin, oo ninka magaciisi bey ogsoonyihiinoo garanayaan, naagta magaceedii iyo ina ayadeedii bey iyana garanaynaan, meeshuu ka soo jeeday garanaynaan. Markaas ninkii oo aydin is aqoonin baa gurigii immanayaa ama ninkii guursadee aroosay ama gabadhii dhashay ee wiilka dhashay amaan buu banaankaas isla taagayaa; gabadhii saas ahayday, ninkii saas ahaayow, halkaa ka soo jeedayow, ninkii wax bixin jirayow, ninkii aabihii geesiga ahaayow, ninkii aabihii la yiqiinow, ninkii gabadhii saas ahayday, waxaasay ammaantaasay sameeyaan; ammaantaa markay dhameeyaan yaa wax la siiyaa.

Haddaba kuwaasi waqooyiga guurka iyo wiilkaba makaraankaasay u gooyaan, calaamadahaasoo ku buruuddana wey yiraahdaan, laakiin ma gabyaan, kuwanina saasay ku shaqaystaan. Kuwo kaloo noocyo kaloo cashaan aniga hadda aan xusuunayn oo dhinacaas iyaguna xaggaas Alto-jubba iyo dhulkaasna wey jiraan, laakiin wixii makaraan gooyaa waa waqooyi, wixii gabyana waa koonfur anigu intaas ayaan kaga baxayaa Caliyow.

C. Mudiir Haa, meeshii baan ka wadaynaa. Waxaa weeye dadka Yibirrada badanaaba waxaa qaata niman la yiraahdo Yibirro, waxay leeyihiin waa sedkii yibirrada, wiilshay ka qaataan, een sida Xaajigu sheegaayey hadda, Xaaji Ibraahim nimankaasi ul bey qaataan, waa niman xeelo badan, aarti bey isticmaalaan ama teknik wax ah oo indhi sarcaad ah, ul bey adeegsadaan, waxyaalo qofka aan aqoonin uu la yaabo ayey ku indho sarcaadaan, dabadeedna waxbey sasameeyaan, een dadkaas ayaa la siiyaa wax kasta aaba ha noqdeene ee dabeedna xersi ama waxyaalo calaamo ahay uga tagaan meeshaas oo qofkii kaloo yimaadaana in sedkaas la baxshay uu u daliil yahay amba lagu garanaayo sedkaan kaleeto kuwa arooska iyo waxyaalkaan kaloo la mid ahna een kuwaas hanoo danbeeyaan bal kuwa yibirrada la yiraahdo iyo sedkooda iyo sey u qaataan ee haddee Dhegaweynow ka hadal waad mahadsantahay.

Dhegaweyne Cali Mudiirow waad mahadsantahay, waxa weeye nimankan caadaqaate aa la yiraahdaa, caadadanay qaataanna waa tan berigaa loo gooyay, waxaanan maqlay labay ahaayeen, labadoodi waxaa la yiri ma waxaad doonaysaan mag mar la idin wada siiyo; mise waxaad doonaysaan wax aan weligii idiinka dhammaan; nin wuxuu yiri aniga waxayga mar baan wada qaadanayaa oo Soomaalidaydaan iska dhex galayaa, ninna wuxuu yiri aniga waxaan doonayaa caadadaa aan mar walba qaadanayo mid Soomalidu dhex galay oo Soomaalidiisu iska dhex galayoo magtiisii iyo wixiisii mar baa la wada siiyay. Kii yiri waxaan weligay iga dhammaan aan rabaa; caadada tan kaasaa loo gooyay; dabadeed caado-qaatuhu saasaa loogu baxshay waa caado loo gooyay, markaa iyagu say doonaan ha u kororsadeene; nimankaanu waa xan. Soomaalidu waxay yiraahdaan war sixir bey yaqaaniin oo kaana waa ku darsadeen, inay yaqaaniina waxaan ku garanayaa ushay halka eryayaan, anigu anoo la jooga in fartaa saarayaanoo xaggaasay u ordeysaa wuu wuu! waa qaylqaylinayaan oo waxaasuu ku qaylinayaa ushaas farta la saaraa kor u orday ee soo noqonayso siduu doono u xukumayo sow sixir maaha? sixir iyo indho sarcaad bey yaqaaniin oo anaaba arkay in ay sixir yaqaaniin taasaan ku xaqiiqsaday. Wax lagaaga sheekeeyo iyo waxaad aragtaa isku mid maaha. Iyadoon ninnaba iiga sheekeyn baan arkay inay sixir yaqaaniin, caadadana markii hore waxaan maqlay waxaa loo gooyay arooskii bay ku darsadeen iyo waxaasay ku darsadeen, kuwa waqooyiga weeye makaraanada wey gooyaan, samanyaa la yiraahdaa, samanyo nimanka magacooda yibrana waa la yiraahdaa; caadoqaatana waa la yiraahdaa oo labadaa magac baa la yiraahdaa, yibrana waa la yiraahdaa. Caadaqaatana waa la yiraahdaa waxaana loo leeyahay cadadaa berigaas loo gooyay bey ka qaataan, waa halkaas Bucur bacayrna in ay ku lug leeyihiinna waxaan ku ogaaday un, dhalayaanu ma ogiye ku lug leeyahay, markay waxaa sameeynayaan ay leeyihiin ay eryayaan usha ee sixirkaa sameynayaan Bucur-Baceyr bey kicinayaano soo qaadayaan, oo Bucur Bacayrkii waxay keenayaan goobta, deynba maayaane iyaga Bucur Baacayrkaasay meesha keenayaan. Marka, nimankaasu waa kaasoo quruun ina rogi lahaydoo ilaahay ina qabtay uunbay ahaayeenoo dadkaa diinka leh inaka qabtay. Waxaa la yiri oo aan sheeko ku maqli jiray ee buur bay tagaan, buurahaa markay tagaanna xanfali baa la tagta, dabayl xanfali la yiraahdo baa la tagta, waxbadanna waan arkay shir la is

weydiinayoo la leeyahay, war ninkee yibir dhintay arkay? war ninkee yibir dhintay arkay? dadka badidiisi waxaan ka hayo ma arkin. Kuwo badanoo Cabdi-gaab la yiraahdoo dhulka yaga joogay wada dhidhintaa la yiriye aniguse markey dhinteen ma ogeen, qaarbadannaa Cali yaraa dhinatay, cabdi gaab baa dhintay, waa dhinteen markey dhinteense ma ogeyn shir badanoo la leeyahay war yibir dhintay yaa arkay oo la is weydiinaayo waa arkay; nimankii ma aragte oo dhinte markey nimanayaanse anigu ma ogeeyn, dadkuna waxay u badan yihiin in nin waliba yiraahdo anigu ma arag meel lagu aasayo. Markaa intaa un baan samanyaha ay qaataan oo ay berigii horena ay wiilashaa ka qaadan jireen; marka wiilasha waa inkaaraanoo sixirkaa ku rida aa iyo inkaartaa marka berigii hore loogu xukumay ku qaadayaaba haddaan wax laga siin siday u badan yihiin dhaandhaan buu noqonayaa wiilkaasu aan meel uu ku socdo iyo meel ka socdo aqoon. Sida qaalibka ah ma dhintaan ee dhimashada Ilaah baa ku lehe kii aan dhiman dhaandhaan buu noqonayaa aan xagna u socon oo haah iska qoslaayoo la leeyahay yibir baa qaaday. Sixirkoodu waadad oo dhan haddii la isu keeno ma furi kari sixirkoodu, iyagaa ka daran. Aadkaa ... ... loox la yiraahdooyibir baa qaaday wax kaga dhacaan, culimada dhulka joogta haddii la isu keeno sixir furi kari hayaan. Yibir un baa qaaday un baad maqlaysaa, ninkaasi hadalkiisa isagoo mar hadal sixira ku hadlay, marna waxaad arkaysaa isagoo isdhaafa ku hadley, mar wuu iska qoslayaa, waa dhaandhaan; war naga daaya waxa yibir baa qaadaye nimankaasi wax loo jeediyay oo ay gar u yeesheen bey ila tahay.

Aniga samanyahaas, waana quruumahaa inaga horreeyay ee la leeyahay, buur baa lagu fariisiyay waxaa, markay waxaa qabanayaanna Bucur Bacayr waa kiciyaanoo waa soo qaadaan, waxayna ila tahay aniga quruun aan isku qolo, isku meelba ahaynoo Ilaahay aynu, aynu dhulka ka qaadnoo Ilaahay uu inaku seladay ay ahaayeen, hadda arooskii bey ku darsadeen; berigii horena saasay wiilasha uga qaadan jireen. Marka raggan ay ka qaadayaan Soomaalidu waa camal xuntahaye rag baa iyagoo gurigii ka ciic leh oo ka qaylinaaya u yimaadda oo xabbad ku rida iyo uleeyayaa iyo dhirbaaxaaba mooyiyee waa cayiiyaan raggay caruurta ka qaadaan waa raggaa sida qaalibka ah. Ninkii ubadkiisa jecel ee Ilaahay towbada ku hagaajinaya taladana waxooduu iska siiyaayoo wuxuu yiraahdaa wakaa waalayaal wixiina waa qaadateene inakala kaxeeya, waa yahay bay yiraahdaano ninkaa waxba uma dirtaan, makaraanadaasuu u jaraa.

Markaa kuwa xanfalida la tagtaa, xanfali baa la tagtaan maqlayoo mid dhintayna ma arkin, kuwaana kuwaan arkay waa jiraan dhintaana laygu yiri, Cali yare mid la yiraahdiyo Cabdi gaab, dhintaa laygu yiri, markey dhinteen iyo wax aasayo ma arag anigu. Buur waana buur baana la yiri meesha xanfaliga ee ay isaga tagto. Mid kalena waan arkay, markay dhaarranayaan waxay ku oranayaan Aklow xanfali ila tagtaa, inay xanfaliga la tagto saas baan ku ogaaday, Allow xanfali ila tagteey kuugu dhaaranayaan, mar hadday ku yiraahdaan Allow xanfali ila tagtaa dhaari uma harin, dhamayste ninkaasi dhaartiisa. Marka intaanu ka warhaynaa annagu cilmigooda iyo inay sixirrowna yihiin Bucur Baacayrkana intaasi un baanu ka warhaynaa.

C. Mudiir Een markeynu ka sheekaynayno ma xuma qisooyinka, ummad kastaaba

waa leedahay waxyaalka qisoooyinka iyo asaadhiirta iyo qaasiidooyinka shacbiga iyo waxyaalkaas oo dhan waanu leenahay; sidii aanu u maqli jirray amba sidaan u arki jirray sideedii yaan u sheegaynaa haba yacni mudeerneeye iyo bedele iyo cusboonaysiiye iyo maha, siday wax ahaayeen oo dhaqankeenu ahaay, waxba yaanan ka tegin siday ahayd aan u sheegno, haddaba kaalintii waxaan soo gaarnay oday Salaad; tafadal.

Salaad

Mahadsanid Caliyow, Horta anigu wixii taariikh ahaa ku noqon maayo oo hadalkii is dul fuul buu noqonaynaa hadalkii Ibraahin soo maray oo taarikhahooda ahaay oo nimankan ka soo sheekeeyay horta anigu xaggaa taariikhahaas mari mahayo, laakiin waxyaalo yaryaroo nimankaani ama ayaga habaaro gaar ahoo ay, wixii ayaga muxuu ahaa macnahooda aan ka garanhayo iyo waxyaalahaasaa aniga aan taatabanyaa maahane haddii hebelkii hadalkii saaka la soo maray haddana aan iraahdo yacnii asagii baan garanayaa haddana uu intaas waa la isla maqli jiray oo yacni dadkii waa wada Soomaali, haddaan ku noqonno hadalkii baa isakaaya buuranayoo is kor fuulahayoo hadhow waxay ila tahay ama dadka dhigahaya ama dadka dhegaysanaya dhib buu ku noqonayaa; haddii kii saaka nin yiri aan ku soo noqonno.
Marka horta waxaan ay yiraahdaan samanyo, Samanyada ay yiraahdaan samanyona waa samanyo laakiin iyaga waxay yiraahdaan samaayo; sidoodana nimankaan Yibir iyo caadoqaate labadaba waa loo yaqaanaa waan un wax Soomaalidu u wada taqaano. Xoolay qaataan, xoolahaas bal yacni carradu waa badan tahay, annagu meeshaas xaggaas waqooyigaas waxaa laga yeelaa haddii waxaas la yiraahdaa ilmaha wax uma dhimmaan la ... ... waa ma garaacaa, mareeraa laga badshaa... ... ... ba la yiraahdaa, dee qofka ma aragtay aan lala jirini waa qaadaan baa la yiraahdaa oo waxaa la yiraahdaa, ilmuhu yibir ku qaad; war kan caado qaadataa qaaday yaa la yiraahdaayoo, wixii huguri xun oo si xun wax u doona oo dhan baa iyaga lagu ismaa, wax allaale wixii si xun wax u doona ama hunguri xun waa lagu ismaa, taasi waa wax iyaga lagu ismaa oo hunguri xumo ah. Marka sida ay dhulka ku kala yihiinna warka Xaaji Ibraahim baa maray oo laba maray, marka labadaas waxba kaga noqon maayo waa intuu maray, marka qolo kale oo waxaa jidha, waxaan u malaynayaa waxaa kuwaas garan kara; Illaa Cali iyo Cabdi Dhegaweyne iyo midna ma tagine. Meeshaan wax ay naga jiraan wixii Marka xagga ka jira bey naga jiraan ayaguna waa isla ayagii, iyagana samayey qaataan, iyaguna geedkaan oo kale oo kani waa labee afar ahoo gooyaan, kan halkaani kuwaan laba qori oo isa saaran weeye kuwaasina afar qori oo isa saaran bey gooyaan, yey gooyaan. Gurigay soo gelihayaan, gurigay fariisan hayaan, la dhaqaajin kari mahayo ee markaas waa qaylin hayaan, waxaad gabay moodid bey sheegi hayaan ayaguna waa jiraan oo halkaanay jiraan. Marka waxaa jira haddii la qadiyo nimanka kan Yibraha la yiraahdo la qadiyo waxaa habaar u gaar ah oo ayaga ay ilmaha ku habaaraan baa jira, waxay yiraahdaan “Xanfaley iyo dubato ku qaaday” bey yiraahdaan, waxay kaloo yiraahdaan: “Bacayrow bulshaalow bulshaalow” bay yiraahdaan kii kale muxuu ahaa saddex bay isku daraan Bacayeow, bulshaalow, beenmasheegow, yey yiraahdaan; haa! ilmaahaas in ay dhintaan baan doonayaa, horta waxyaalahaas wa wax ayagana sirtooda haoo waxay ku habaaraan ilmaha ay ku habaaraan

markii wax loo diido, marka ninna waxbuu siiyaa, ninna waaba la uleeyaa, oo ul baa laga badiyaa wax ay wax u noqdaan ma jiraan, marka habaarkooduna caynkaasaan u maqli jiray. Marka waa badan yihiin ushii waa la tilmaamay horta wixii aniga aan ka garanayo intaas weeye haah, hadalkiin in aan badiyo...Caliyow bal haddee nin kale u dhiib.

C. Mudiir Nimankaan sheekadoodu ma badan karto sababta ayna u badan karin waxaa waaye ayaguba ma badna, qabiil la leeyahay waa Yibirro oo meel deggan ma arkin, int as anigu aan jirane mar uun nin uun socda oo la leeyahay aroosow Yibir ka rabaa iyo wax caynkaasoo xunow ka rabaa mooyaane dad aan aqaanoo badan oo meel deggan oo socda maba arkin. Marka dadku dad yar weeye, qabiilna maba ahane waa qof qof , marka aad bey u yar yihiin, sheekadooduna ma bada karto, dhaqankooduna ma bada karo, saan u soo sheegnay qolooyinkii kaleeto farsamo yaqaanka ahayd nimankaanu farsamo yaqaan iyo wax ay yihiinna ma leh, waxay bulshada ku kordhiyaana ma aan arkin magac ay leeyihiina ma aan arkin, caadoqadate iyo yibirro iyo waxaas waa un maqalnaa aragtina waa la arkaa, laakiin ma badna, waxa ay bulshada qayb ama kaalin ay joogaanna ma aan arkin, bal Sheekh Abuu adigana bal haddee ku kordhi oo wax xusuuso, waad mahadsantahay.

Sh. Abuu Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Caliyow waad mahadsantahay. Aniga ee waxbadan ku soo taataabanaa, waa sidii aad u tiri ee ma bana dadkaan xaaladdooda ee Yibraha iyo samaydi dadba sii u yaqaano, dhinacaan koonfur sii lo yaqaano, yaan wax ka taataabanaa ee Yibri iyo samayo iyo ma naqaan dadkaan koonfur iyaan wax ka sheegaa, waa gabyaan sii oo u sheegay Fiqiburaale dadkaas waxaa la yiraahdaa *gobyow* iyo *xooggaboorre* hooggi-boore, iyo gabyow aa la yiraahdaa, dadkaas baa joogaan, dhinacaan koonfur, dadkaas markii mar allaale markii aadiga-wiil la dhalo mise aroos gabar la guursado labadaas baa kuu immaanayaan, banaannkaasaa iska joogsanaayaan, waa gabyaayaan, immaashadooda horta dad baa u jooga xaafadda u soo sheega, xaafaddaa dad u jooga oo u soo sheega, xaafad kasta dad baa u jooga, waxaad muddaa sidii yacni dad baa meel oo ku diyaarsanaayaan,waana loo fiiriyaa meesha inta uurka ay leedahay aa la ilaalinaa aa la ilaalinaa waa la daba joogaa, xaafad kasta waxaa u jooga sidii hadda oo xaafadaha loo qaybiyay oo kale yacni, kontonkii guri, labaatankii guri, qofbaa u jooga oo u wareega oo u jooga fiiriya naagaha ay la sheekeystaan ay dhahaan noo fiiriya, markay naagta uurka leedahay aa la fiirinaa, haddii wiil dhasho waa u soo sheegaysaa haddii gabar la dhalo ma kuu immaanayaan, haddii aroos dhacaan oo gabar la guursadona waa kuu immaanayaan. Marka gabyow iyo xoogga boore ayaa la yiraahdaa dhinacaan koonfur, xooggu-boorre haa! cashaan xooggu booran, marka dadkaas, markey immanayaan bannaankaa soo joogsadaan gabay baa bilaabayaan, waxaa ku gabya ee aniga gabayga anoo aqoonin waxay danta igu khasbaysaa in aan dadkaan xaaladdooda sheego, ayaan iska cariirsanaa sidii aan maqli jiray, waxay ku gabyaan: “Aniga gendahaan soo qaadi, gurigiis gaarkiis goodaalka anoo fadhiyo, yaa gabar iigu timid, geesiyaa guri fulaan ayaa lagu dhalay, gabaygaasaa ii soo sheeti, markaasaan gendehaan soo qaadi, waa soo geeddeeyi gurigaagaan immid, adiga aw-gaab fulaanow geesigii yaa ku dhalayoo,

ee gabar sidaanaa ku dhashayoo.” Ammaantaasaa yacni dadka ammaanayaan, gurigaagaan joogaa geesiyaa lagu dhalay aan maqlay, gurigaanaan maanta imid, waxaan rabaa in an hadda maanta aan ka qaato, geesi haddii la dhalay oo Guulle weyne uu keenay, waxaan rabaa inaan geel gacanta la iga soo saaro, geel aan ka qaato, haddii geel la i siinayn, in jiirey lo’aad aan ka qaato, haddii jiirey lo’aad la i siinayn, gaagaabka ari in la i siiyo oo gacanta la ii saaro, haddii gagaabka ari la ii waayo, guf cad inaa garabka la iiga saaro, guf cad haddii la ii waayo gaduudey oo gacanta midig la iiga saaro; lacagtuu u jeedaa, iyadoo saas aan la ii siinin goodaalka anigoo jooga, oo la iigu siinin gurigaan soo geli maayo, markii guriga soo galana inaan guri la i geliyo gogol la ii fidiyo googoos bun ah la ii duubo ee gogosha la ii soo geliyo, markaasaa aniga geeraarkeyga meesha ku joogsanaayaa, geesigiina markaasaa Guulle oogu tuugaa inaa geesi noqdo oo galmad ow qaato, oo geed gooyow ow galo oo geber guursado aan Guulle oogu tuugaa. Saas ay gabyaagaan nimankaas intii aan ka aqaan markii bannaanka joogsado waa la soo wada baxaa, xaafadda oo dhan waa la soo wada baxaa ninkaasaa la dhegeysanaa, ammaan waa la maxsharaa, mashxarad, carrabdhow, koonfur carrab dhow baa yiraahdaan, maxsharad baa la suubinaa. Markaas dadkii iska ceebsanaaya oo guriga joogaan xattaa haddii iyaga gacantooda wax ku jirin, waa in ay iska tashtaanoo deyn raadiyaan ceeb, gurigaas waa lagu guursaday mise wiil baa ka dhashay, markaasaa dadka u soo galaan; “Ar lafa huris waaye lafahiina waa huriyeene ee gabyow baa idiin jooga waa hoogguboorri, habaar ku mare, war ninkaan waa waa haddi maa qaylo galay wax iska siiya hee” dadkii baa dhahaayaan dadka sidii xaalkooda yahay lama oga, wax inay haystaan lama oga, waa la soo buuxsamaa bannaanka oo dhan, ninkaan illaa wax laga siiyo maanta oo dhan waa daldalmaayaan, yacnii marba mar waxaa dhahaayaan, marba gabayga go’da waxaas yiri: ga’ qureen dhigan waaye Guulle Ilaahay, goobtaan waxaa i keenay geesiyaa lagu dhalay, gendaha ma soo qaadi lahayn, geeraarkaas aan ku hayaa goobtaan. Mar saasuu dhahaa; sedkeyga in la siiyaan rabaa, ma sabraayo iyadoon sedkeyga la i siinin, meeshaan kama sabraayo, marka marba gabayga waxaa weeye alif aa ku shekeynaayaan. Marka dadkaas waa badan yihiin ee mana badna, laakiin dad yaroo, sidaas ku shaqaysta oo habaar wataan waa habaartamaayaan haddii aan wax la siinin, oo banaankaas inta baxo, ninkaas gabyaayga ah bilxaqiiqo waxaa la arkaa habaar oo yacnii u kacsahaayaan, wiilkii meesha waxaa la arkaa inaa jirro ku soo booddo, jirro Ilaahaa wadaa dhimashana Ilaahaa wadaa, laakiin dad baa u saarsiinaya, waa habaarayaan habaartii wax badan baa; habeenkii naagahana qalbigood baa siiyaan dadkiina waa caadi qalbigooda siyaan. Markaa waxay dhahaayaan dadka waxay dhahaayaan “war caado la gooyay caro allay leedahay” war caado waaye war soo sooreeya dadkaan aan la dhahaa marka qalbigood bey siinayaan, haddii wax la siinin adooga naftiisa haddii ku soo gaaro waa caynaa meeshuu ka burinaa, haddii buriyo wiilkii qaylaa la soo boodaa, cudur baa la soo boodaa, teettanaa ku dhacaysa, Ilaahay amarkiis, waxaa la dhahaa... ... ... waa kaas hooguboorre waaye, gabyowgii waaye, gabyowgii baa iska cayriyay, dadkii dhannaa waxay dhahaayaan ninkaas waa ninxun yacnii waa caadi. Ninkaas oo bannaankaas ku joogo odaygii oo guriga iska lahaa haddii joogin yacnii haweynaydii aa dad u diraysaa waa loo baxaa

rag baa u baxaa, gacantaa garabka laga saaraa raali ahaw soo gal gurigaa la dhahaa, bannaankaas aa waxaa ku dhahaa. Anoo banaankaan jogo soo geli maayo wax la i tusin guriga soo geli maayo, markamarkasaa la tuugaa gurigaa la gelinaa, dadkaas saas waaye, oo gabyaag koonfur gurigaa la gelinaa, dibadda ley ma lagu diraayo, bannaanka wax laguma siinaayo, weliba in la fadhiisiyo oo guriga la geliyo gogol la fadhiisiyo qabees la siiyo bun loo dubo markaasaa wax la siinaa oo nimanka kuunfur gabyowgu waa saas. Markii geber la guursadona waa sidaas markaa ama markii gabar la guursado waa ammaanaan ee ninkii gebertii guursaday iyo abkowgiis iyo aa la ammaanaa meeshii ka soo guureen, waxay ka soo guureen Gedo iyo Gasaas markii laga soo guuraayey, gendiga soo qaadeysay oo gedo iyo gesaas dadka oo dhan ka soo guuraayaan, idinka waxaad ahaydeen dadkii waxaa ku soo guuri dad waxaa ku soo guureen geed goonni, dad waxaa guureen gaagaab dameer, dad waxaa ku soo guureen gurey lo'aad, dad waxaa ku soo guureen geel, markii Gedo iyo Gesaas laga soo guuraayey oo dadka oo dhami soo guuraayey, idinka kuma soo guurin, idinka faras baa ku soo guurteen, idinka saasaa aheedeen, dadkaas yacnii si gaar baad ahaydeen, dadkaas soo guuraayeen gebiga ku soo guuraaye gebiga ku soo guuraaye idinka ka gaar baa ahaydeen, ee goosha.

Dad baa la yiraahdaa oo laba qabiil oo la kala yiraahdo Eyle iyo qabiil la yiraahdo Garre ee ammaantaan waa soo galaayaan. Markii Gedo iyo Gassaasi laga soo guuraayay hal meel baa la soo qaadi oo waadi duur eh oo la soo maraayo, dadka oo dhan meesha la soo maraayay, waxay leeyihin dadka dad walaalo ah ayey ahaayeen, sidii la isku jecelyahay haloo guuro, markii la yiraahdo hala guro oo walaalnimo waa la guuri waayey, laakiin dadka sidii isu jecel yahay, haloo guuro markii la yiri saas baa loo soo guuri, dadba ii haweenkiis daba ii qooskiis, qooswalba dadka is jecel qooskoodaa la soo guureen. Markii meesha la soo guuraayi, dadka oo dhan markii qof walba soo guuraayi waxaa joogti (libaax) gool libaax aa joogti jidka marka gooshaas baa geber loo xiraa, qooskaas gebertaas haddii laga cuno oo laga jabsado aa soo guuraayaan, haddana berri qooyskii soo guuraaya hal geber baa ku xiraayaan, geber garoomey ah, oo geber inan eh, markaasaa saasaa u soo guuraayeen yaa lagu soo gudbaayi, marka ee la gaari gebertii garre markii la gaari qoyskaas Garre soo guuraayi markaas baa la yiri; berrii idinka waa guureysiin gebertii iska geeya oo u geeya goosha libaax oo goosha u geeya. Markii gebertii la yiri geber fulaan aw fulaan gebertaadaa geynaysaa oo la yiri, marka gebertii baa loo sheegaa, madaxaa loo xiiraa, waa loo cillaamaa waa loo qabeynaa, berrii geedkaa lagu geynaa geber saasaa lagu guuraa haddii kale goosha dadkoo dhan baa hallaynaysaa, unukaa naloo soo sheegi, unukaa iska leh guurmaadka. Markaas gebertii Garre habeenkii dhan waa ammaantamaysay, Aniga oo goosha i cunayso oo geedka la igu xiraayo gumees gammaasay, geesi ma joogoo, aaway guntii gembiga haysay? Aaway guntii gun Eyle, aaway ma joogtoo ar maxaa jira? aniga maxaa geed la iigu xiraaya oo goosha ii cunaysaa, saasaa ku gabyeysaa. Markaaasaa waxaa u soo baxay gunta la yiraahdo gun Eyle, markaasaa dadka naftirkooda gabayga aad u yaqaana oo u yaqaanay; arooska iyo ka qaataan u badan waaye ku jira iyo ilmaha la dhalay, Markaasaa ay maqleen iyadii, markii gabadhii geedkaas lagu xiray oo gabaygaan

maqleen, markaasay yiraahdeen geedkaan haddii lagugu xiray adigu geber garraa tahay annagu gun Eylaa nahay, goosha maku cunayso, unukaa gaarkaa joogsanayna, geedka gaarkiisaan joogsanaynaa, gosha haddii soo baxdo unukaa goonka ku dhifanaynaa, isha goonkeeda amase gendigaan ku dhufanaynaa, adiga geedka laguugu xiro laakiin goosha kuma cunayso; geeraarkaas ayaa loo sheegi gebertii Garre saasaa loo sheegi. Markii sidaas loo sheegi, gebertii guntoodii waa u sheegti geedkii yaa la geeyi, subaxii gooshii intii ay soo bixin geedkey galeen guntiina reer Eyle, marka gebertii Garre markii goosha soo socoto arkeen, guntaan saddex waaye, saddex walaalo ah, saddexdii waxay yiraahdeen: waxaa la yiri waxay wateen gammuun, fillaaro; mid gammuun madoowe, mid gamuun gaduudane, mid gammuun cad watta, dadka reer koonfur hadda gabaygaan aad bey ugu dheeryihiin - ma garateen, dadkaan oo arooska iyo umusha ka qaataan dadkanaa yacnii aad ugu dheeryihiin. Marka saddexdaas gammuun saddex walaal ah waaye, waxay yireen adiga intee ku dhifanaysaa mid wuxuu yiri; aniga isha goonkeeda ayaan ku dhifanaa, midna waxaas yiri aniga gollanka, midna waxaas yiri aniga gendaha aan ku dhifanaa, saasaan u kala gemmeynaa ninba fallaartiis tii oo u caaqibo leh aa la arkaa, saasay ku heshiiyeen. Markii gooshii soo baxaday saddexdii walaal oo intii gebertii garre la cunin laakiin loo soo dhawaadi, filaartii yey isla gammeen mid goonkaanaa ku dhiftay, mid gendiga, midna gollonka. Marka gooshii waa dhacday, gebertii Garre geedkii waa laga soo furi, sidii yaa dadkii oo dhan ku soo guureen oo ay ku soo gudbeen, marka hadda al’aana Ballan oo ay dhigteen aa jiraa, Garre iyo dadkaan Eyle oo balanaa u yaal; markii gebertooda la guursanaayo neef illaa wa illaa neef iyo waxaa la siinaa, si ay wax la siiyo waaye, ballanaa u yaali, gebertaas ay soo gudbiyeen. Marka ee meeshaa lagu guursanaayona illow walaxaa laga siiyaa, walaxay ka qaataan; waa ammaanaan, walaxay ka qaataan waa is ciseeyaan. Marka gebertii geedka waa laga gooyi saasaa lagu soo gudbiyi, gooshii waa la dilay, marka goosha waxaa la yiraahdaa, goosha yaa gamay? Saddexda gammuun yaa gamay? Gammuun cad miyaa? Gammuun gaduud miyaa? Gammuun madow miyaa? yaa gooshii ridi oo dili, saasaa isku xiraayaan. Marka waxay dhahaayaan, gammuun gadduud waxaa ku dhifti goonka, gammuun cadha goonka ku dhifti, gammuun madoowha gendahaa ku dhifti, goosha yaa galaangeliyi, yacni yaa aad u galaangeliyi, goonka kii ku dhifti yaa galaangeliyi, gammuun gaduud baa la yiraahdaa, labaadas ninkaas baa hadda ka danbeeyaan, gammuun gaduud dadkiis faraciis yaa hadda laga danbeeyaa, marka haddii meel ku kulmaan ninkaasaa la ciseeyaa, marka dadkaan haddii la guursanaayo gaar ahaan, gaar ahaan dadkaan ammaanaan waa la siinaa xoolahoodaa la siinaa, dadkaan aa la siinaa wey ka qaataan, waa la siinaa, waxay ka dhigteen caado, waa caddeysteen. marka waxay... ... ...anoo gabay aan aqoonin yacnii laakiin intii aan aniga maqlay dadkaan intii aan aniga ka maqlay oo yacnii gabyaay ah iyo xooguboorre la yiraah, haddii soo galaan, meel lagu guursadi oo guur jiro maaha keliya dadkaan Eyle keliya maaha dad badaan baa jira oo waxaa jira degmo kasta, gobol kasta waa ku jiraan, laakiin dadkaan waxaan ka soo qaati, inay dhacdi saas caadadi ayaa jirta lammadaas qolo Garre iyo dadkaas reer Eyle caadadaas iyo ammaantaas iyo difaacaan u dhexeeya u maray ayey dhacdi. Marka dadkaas oo geberta la guursanaayo mise wiil haddii la dhalo waxaa ka

qaataan gabyaa baa la dhahaa iyo xoogguboorri sidaas bey y gabyaan waa tii aan aniga idiin sheegay, sidaas bey wax ku qaataan, markaas baa la siinayaa ninba wixii yiraada ee... gacanta laga saaraa, waa tii aan idiin soo sheegi ama guf, ama lacag, ninba wixii la siin karo laakiin iyaga waa iska sheegaan, wax weyn bey iska sheegaan oo aqli gelayn bey iska sheegaan oo waa ammaan ee dadkaa la ammaanaa, marka taas maku dheeraan karo meesha ayaan ku joojinaa, haddana Caliyow iyo intii fadhiho Fiqiburaale iyo Dhegaweyne iyo Salaad waa mahadsantihiin, intaanaan aniga aan ku darsadi ee Asalaamu calaykun waraxmatulaahi wa barakaatuhu.

C. Mudiir

Horta mowduuca maanta wuxuu ahaa Yibraha iyo sedka ay qaataan, haddii la wadwaday, waw buuxsamo waw badan waayey, caado qaate ama sedka Yibiraha ama yibiraha iyo waxay yihiin. Een waxaad moodda inuu qisadaas iyo alaabtaas ay saas u badnayn, waxaa loo buuxiyay laashimada ka qaadato aroosyada iyo ummulaha, gaar ahaan wiilka markow dhasho oo la faaniyo inankii dhashay, labadii dhashay iyo qabiiladii labada, ninka iyo naagta ay ka yimaadeen, badanaada laba labey isu soo raacaan, ama saddex saddex ama kaba badanba, ama afar bey isu soo raacaan, ama saddex saddex ama kaba badanba, ama afar bey isu soo raacaan laashimada, meesha aroosku ka dhacay ama wiilku ku dhashay ayey yimaadaan. Xattaa lo’da saasay yeelaan, wey duceeyaan wey ammaanaan, waxbey kala sheegaan, waxa la yiraahdo sed bey siiyaan sida Shiikh Abuu u sheegayey. Waxa ay jeclaan lahaayeen ciddaasu wiilkaasu inuu noqdo, labada dhashay waxay ahaayeen waxaasaa la sheegaayaa, dadkii markaas een qof qolo la arkaba awoodeedda ayey bixinaysaa, waa lagu beritamaayaa, faankaas een dadkaas iyagu dad caadi in ay yihiin ayaa suurowda oo un iska laashimiin ah oon ahayn dadkii Yibirrada ahaa aan ahayn oo un laashin ah, af maal ah weeye; arrimahaas awalna waa laga sheegay waxaad moodda inaynu saas saas u badnaan kareynin marka bal; bal hadee waxaad xusuusato haddana ku dar waa yahay.

Sh. Abuu

Caliyow waxaan xusiistay ninka haddii gabyaayoo saas u jooga laakiinse uu joogo waxaa immaanaa laashin kale, nin kale, nin kalaa immaahaa oo saaxiibkiis eh, waa is ogyihiin ninkaasaa immaanaya. Marka ninkaas haddii reerkaas uu ammaanayo ninkii kale waxaa dhahaa waa caynaa cidda kaluu caynaa laashinka laashinka kale; ciddaan oo adiga aad amaaneyso, waa cid oo weligooda sidaas ahaayeen oo reerkooda xumaay oo dad xun ahaayeen oo yacni gurigooda, heddooda wax maka bixi jirin, yacni wax ma bixin jirin, waa dad sidaas ahaay oo malaaq ahayn, dad malaaq ahaynaa adiga malaaq ka yeelanaysaa, dad geesi ahaynaa adiga geesi ka yeelanaysaa, dad weligooda aan waxba ahaynaa aad maqaam gaarsiinaysaa, sidaasow ku daldalmaa ow ku caaynaa mise-habaynadii iyo ninkii labadoodba waa caynaa, labadaan is guursadeen waa labo oo sidaas eh, oo lami yacnii qalbi shaddiid qalin ma laga qaato, haa! laashinka waxaa dhahaa qalbi shaddiid baa u qaylinaysaa; qalin malaga qaato qalbi shadiid qalab malaga qaato, qaylada haku dilinoo, yaa qaylada ku dilinoo yacnii qabiilkooda iska dhaafoo qabiilkooda waa xunyihiine qaylaa ku dilaysee qalbi shaddiid maaha, qalinaan ka qaataa, weliba ee qalinaan ka qaataa, wixii oo qalin

qaali eh iyo qaarin geel eh aan ka qaataa; kanna waxaa dhahaa, qaalin wax ka qaali aan ka qaataa, qaaarin geelaan ka qaataa qalbi shadiid ma ahan dadkaan, saasay ku tartamaayaan, kan waa caynaa kanna waa ammaanaa. Si uu wax uga soo go'o.....waxaanna heshiis bey ku yihiin, caayda waa been, waa heshiis ay ku yihiin, marka dadkaas waa dad yaab leh dadkaas waa dad yaab leh oo aad iyo aad u yaab badan. Wax badan la kulmay anaaba layga qaatay, cashaan waxbadan bey i kululeeyeen, waxbadanay iga qaateen, wax badan wiil ii dhashay oo iska weynaaday aa la iigu yimid, haddaan soo maqalnay, waxaa weeye Xamaraan ku dhalay wiilka waxaana layga yimid Koonfur; waxay yiraahdeen, wiilkuna waa wiil dugsi ku jira, haddaan soo maqalni waxaan maqalnay wiil baa kuu dhashati. Gaar Dhoobayaa kugu soo qaadni gadhi baaburaan soo koronay waa kuu soo geeddi gelni, guriga Xamaraan kuugu nimidi, anigaa saas la iigu gabyay; geesi baa ku dashi hadduu goosihiisii soo baxay waxaan kaa qaadahaynaa geni aan kaa qadahaynaa. Gabaygaas aan kuugu soconaa gaawo reer… … … baa lahay adiga markii la soo guuraayi geel baa ku soo guurti gaawoow reer… baa tahay anaa saas la iigu gabyay, ani naftirkeygaa saas la iigu gabyey, dadka oo gaagaab dameer ku soo guuri ma tihid, geel xariir baad ku soo guurti baa la iigu gabyay, geesiga kuu dhashti goos haddii u soo baxay xattaa annagu genni baan kaa qaadaynaa, jiirey lo'aad ma rabno, gaagaabow ma rabni, geel baan kaa rabnaa, anaa saas la igu gabyay.

Gendiga adigaan kuu soo qaadni gaadiid aan kuu soo korni, gendiyaan kuu soo qaadni, guriga Xamaraan kuugu nimid, hadda geesigaasaanaa u soconaa, in aad annaga guriga na gelisid, gogol noo dhigtid, googgos buneed noo dubtid, anaa saa la iigu gabyay.

Midna waxaas yiri haddii aan ka daahay aniga aan wax yar ka daahay waxaa la yiri geelka ku soo guure markii la soo guuraayi aad tiri, qaawo reer … … ku sheegaysi geelaan ka soo qadaa aad lahayd, hadda meeshaan geelaas sheegaysaa ee jiray lo'aadaa sheegaysaa oo gaagabay oo eri yaad sheegaysaa gufna kuma qaadanayso gurigaani, midna saasow ii caayaa, saasow iigu caayaa, gurigaaneyto gunna kuma qaadeyso. Saasaa lagu tartami; bannaankaa lagu tartami, markii cabbaar, kas aan u yeelay, waa ku jiraa aniga bannaanka aa saas la igu caynaa. Mid waa i caynaa mid waa ammantamaa. Labada waa tartamayaan. Marka bannaanka garabta aa gacanta laga saaraa la soo tuugaa aan guriga soo geliyay. Markaas aan ku iri, guriga aan ku soo gelinaa, gogol aan kuu dhigaa, googgos baan idiin dubaa gufna waan ku siina aan iri.

Marka dadkaas waa niman yaab leh. Mid waa ku caynaa midna waa ku ammaanaa. Lashimiin waaye waa dad yaab leh, arrintooda aad bay u dheertahay, laakiin lama dherayn karo.

Intaan baa arrintii ku joojinataa.

C. Mudiir — Waa sii wadaynaa, ee Yibirka ama *caadoqaataha*, Bal Axmed Nuur Waxaa ow nooga haayo, Bal Axmed Nuur waxa aad nooga hayo, dadkaas iyo iyo dhaqankooda iyo sey u dhaqmaan iyo taariikhdooda iyo wixii suugaan iyo gabay iyo oraahyo laga hayo bal haddee Axmed Nuurow soo daa!

A. N — Horta waad mahadsantahay Caliyow, inkastoo aan ka maqnaa dooddii

horreeto oo laga dooday Yibirka, laakiin nasiib wanaag maanta ayaa la ii soo ceshay, waadna ku mahadsantihiin inaad ii soo celisaan ee Yibirka anigu horta wax badan baan isku dayey in aan baaro erayga Yibirka ah, iyo Yibirka wuxuu yahay iyo caadaadkiisa, laakiin wey ii suuro geli weyday oo baaritaankii weli kama aanan dhergin, waana aan daba taagnahay oo weli waan doondoonayaa, ee wixii wax ka sheegana wan jeclahyoo aad iyo aad baan u raadiyaa, oo u baaraa ee hasa yeeshee wey ii suura geli weyday oo dadka caadaadkaas leh ama la yiraahdo waa Yibiraha oo samaanyaha iyo qaata ee dhaaqankooda lama fahmi karo, waayo dhaqanku waa dhaqan ay ku shaqaystaaniin oo ay xirfad ahaan ugu dhaqmaan, wax badan bey qariyaan, marka wax badan oo xaqiiqadii runta ah lama igaan karo iyaguna ma doonayaan in ay in ay sheegaan, waayo waa sir u qarsoon oo hab u qarsoon waaye. Gabayadooda lama ogaan karo oo kuu sheegi maayaan ee caadaadkooda iyo dhaqankooda kuu sheegi maayaan, hasa yeeshee waxyaabo aan buunbuunsaday iyo xoogaayoo aan ka leex tukaalaystay, haddii aan ka hadlo eraygaan yibirka ahi waxaa loo malaynayaa inuu ka yimi Cibraay – Yibraay, inuu ka yimid aa loo malaynayaa, ee waayo dhawaaqiisaa ayaa xoogaa yar isbedelay, wuxuu ahaa Cibraay, ayuu ahaa Yuhuud ayuu ahaa oo diinta Cibraayiga ah ama Afka Cibraayiga la yiraahdo ayuu ka yimid, dhulkeena intaan diimaha diinta ugu horreysay oo Cibraaya ayaa soo gashay ee Yuhuudda ayaa soo gashay, waayo ninkii la oran jiray Joor Saliim ee dagaalkii ugu danbeeyay waxaa la yiri Tajuura ayuu ku jabay, marka ciidamadiisa meeshaas ayeey ku baaba'een ciidamadiisii, firxaadkoodii waxay kala galeen dhulka Soomaaliya, ee waxay soo galeen Tajuura, ama meeshaan Jabuuti hadda la yiraahdo ama Berbera iyo agagaarkaas ayuu ku jabay ee ciidamadiina ma noqon ee dhulka Soomaalida bey soo galeen, marka diintaasu waa soo gaartay dhulka Soomaaliyeed, soo gaaridii ay soo gaartay ayaa waxaa nimankii watay diintaas ayaa waxay sheegan jireen Cibraay, markaasaa dadkii… … … ahaa dhawaaqii waxay u bedeleen Yibraay, Yibraay, oo marka caynkii bey ya' u akhriyeen, Cibraay – Yibraay, erayga saas ayuu horta ku yimid ayey culimada qaarkood leedahay, taas waxaa inoo caddaynaya markii uu soo galay diinta Islaamka ee aad bey ugu xoog weynayd diinta Cibraayga, marka dowlad bey ka dhisteen baa la yiri oo waxaa jira ninkii la oran jiray Bucur Baacur ama Bucur Bacaayir, iyo ayaa haystay baa gobollada tan waqooyi oo dhan isaga ayaa xukumay, ee waxaa jiray ninka la yiraahdo Muruq Maaruq markaynu u fiirsano isagana caadaadkiisu waxay noqonayaan wuxu Yibraay, Yibir buu noqonayaa oo diintiisa iyo dhaqankiis dambe wuxuu noqonayaa ee iyaga ayuu ka mid ahaa baa la yiri, waxaa ka mid ah ninkaan la sheegaayo ee Muruq-Maaruq ama Muruq Taaruq ee raggaas oo dhami waxaas ayey noqonayaan ayaa la leeyahay, markaa markeynu ka hadlayno dhaqankan la yiraahdo dhaqanka Yibraayiga, waa dhaqan diini ah oo diin ka yimid ayuu ahaa, waayo dhaqankooda iyo markii dhaqanka aad akhridid dhaqanka diinta Yuhuudda iyo dhaqankooda markad isu akhriso ama dhaqankooda baartoo dhigto waa … isku mid waaye sheekoyinkooda waa sheekooyinkii waxyaabaha ay ku dhaqmaayaan waa isku dhaqankii, wax yaabahooda waxayna u badan yihiin sixir, Yuhuudda iyana waxaa lagu yaqaannaa sixir yaa lagu yaqaannaa marka een sheekooyinkooda waa sheekooyinkii, waxaa weeye ninka shaqooyinka uu qabtaa waxa weeye horta ninka Yibirka ahi

waagii hore intaan diinta Islaamka soo geli jirin ayuu gabdhaha mehrin jiray, wiilkii dhashana wuxuu u bixin jiray waqlal, ee waa u waqlali jirayoo magac buu u bixin jiray, gabadhana waa mehrin jiray. Marka shaaqaduu qaban jiray waxay ahayd shaqadaas ayey ahayd marka diinta islaamka kolkey soo gashay wey la dirirtay middaas oo waa lagu qaaday oo Shiikhii Islaamka ayaa gabadhii mehriyay, wiilkii dhashay oo curadka ahaana isagii ayaa ku waqlalay oo u bixiyay ama u wanqalay oo magac buu u bixiyay, sidaa awgeed ayaa dagaal iyo hirdin ka dhacay marka herdinkaa ka dhacay laba diimood oo diriray oo laba diimood oo labadii dad kala haysteen dirireen inay tahay waad u jeeddaa, wey caddahay diintasuna wey ku faahtay inay dhulka Soomaaliyeed ku faaftayna magacyada ayaa I tusinayaa, waxaa ka mid ah dhulka qaarkiis waxaa la yiraahdaa Buuro-Yibirood oo Aalta Jubba ku taal ayaa jira, een roga Yibrood, Tog Yibrood, yacni dhulka Soomaaliyeed aad bey ugu badan yihiin, marka inay magac waa ku lahaayeen waxaa kuu muujinaya dhulka ay deggaanaan jireen ama ay degganaayeen ayaa iyaga loogu magac dari jiray, marka ninka weyn baa dhulka loogu magac daraa, marka diin bey waa ku lahaan jireen dhulka Soomaaliyeed Haa! Ceel-Yibireed la yiraahda oo fartaasuna farta Cibraayiga ah weeyaan haddii la baari lahaa ayaa taas laga heli lahaa, marka qoladaan Yibraha sheekakooda waa sheeko aad u dheer taariikhda Soomaaliyeed bey aad barbar weyn ka soo gelaysaa, laakiin dhaqankooda markeynu u fiirsanno dhaqankoodu waa dhaqan diini ah oo xag diini u dhisan ee ka duwan diinta Islaamka ee dadka Soomaalidu ay haysato ka duwan dhaqan ka duwan kow. Waxaa lagu leeyahay sheeko ku tiri ku teen ah oo odayaasha ay ka sheekeeysaan baan moodayaa, ninkii Bucur Bacayr la oran jiray iyo Shiikh Yuusufal Kownayn ayaa isqabtay, nin waliba wuxuu la yimid diintiisii wey murmeen, markey murmeen baa nin waliba burhaantiisa iyo karaamadiisa ha muujiyo la yiri; markii intaas la is yiri ayaa Bucur Baaceyr wuxuu la yimid baa la yiri sixir, ayuu la yimid, sixirkuu la yimid waxuu ahaa; buurbaan ka dusihayaa, buu yri, buurtii wuu ka dusay, wuu ka soo baxay oo hadba dhinacii buurta uga dusay, buur weynoo la yaqaan oo hadda buur Yibrood la yiraahdo, Marka Shiikh Yuusufal Kownayn wuu yaabay oo Asmaacul Acdam buu akhristay baa la yiri, Asmaacul addam markii akhristay ayaa Bucur baacur meeshii waxaa ku qabsaday buurtii oo buurtii baa ku dhegtay, “Khud yaa arlu Laahi” buu yiri baa la yiri siday sheekadu in leedahay, dee sheekadu waa iska ku tiri ku teen, oo waa ku tiri kuteen laakiin… bey leedahay oo ujeedooyinkeeda ayaa weyn. Marka Bucur Baacur meeshii ayuu ku dhintay baa la yiri markaasaa dadkii meesha degganaa ku qayliyeen Yuusufal Kownayn oo waxay damceen in ay dilaan, marka Yuusuful Kownayn oo waxay damceen in ay dilaan, marka Yuusuful Kownayn wuxuu u sameeyay wax la yiraahdo ee wuxuu u gooyay baa la yiri sed oo sed buu u sameeyay sedkii wuxuu noqday baa la yiri wax la yiraahdo samanyo, wuxuu yiri samanyo ayuu u qoray, marka samanyihiin saas buu ko soo baxay bey leeyihiin oo Soomaalidu leedahay hasa yeeshee haddaad u fiirsato wuxu ka weyn intaas oo sheekadu wey ka sii weyntahay intaa wey ka ballaarantahay, sheekadaa ku tiri ku teenta ah waxaynu ka fahmeynaa waa in halgan diimeed iyo iska soo horjeed diineed; diinta Islaamka iyo diinta Yuhuudda oo Cibraaayga ahayd oo Yibruhu wadeen oo iska soo horjeeday inay arrintu ahayd ayaad u jeeddaa, marka waxaynu arkaynaa

ee arintu arrintii waa ka sii fogtahay oo waa ka qoddo fogtahay, waxay uga sii qoddo fogtahay ee ninka kani wuxuu qabto dhaqanka markeynu eegno ninkaanu gabdhuhu mehrin jiray, waa kow; gabadhii la mehrinaayaba isagaa loo geyn jiray bey sheekadu in leedahay, sheekooyinka qaarkood in leeyihiin, kow haddee gabar yaa mehriya? Gabar sheekh baa mehriyaaaa haddee gabar diin baa lagu mehriyaaye diintii markaa jirtay baa lagu mehriyaa, marka waa sheekhii, oo sheekh buu diintaa Yuhuudda ka ahaa waa kow. Wiilka dhashana waqlal buu u xiraayoo, makaraan buu ku xiraayoo, waqlal buu, magac buu u bixiyaayoo illaa isagu uu makaraanka uu ku xiro ee magac looma bixin jirin, taasna waxaa waaye, haddee wiil hadduu dhashana culimada loo yeeraayoo waa loo duceeyaa wiilkaasoo wiil raga inuu noqdo, culimada loo yeeraayoo waa loo duceeyaa wiilkaaasoo wiil raga inuu noqdo, culimada Islaamkuna saasay qabtaa, hadee ninka wiilka marka magac loo bixinaayo haddee ninka u magac bixiya waa shiikh oo waa sheekh. Marka halkaa waxaynu ka arkeynaa inay waxu wax diini ah yihiin laakiin diinta Islaamku ay ku samaysay ee baabi' isay oo la dagaallantay oo shirki u aragtay oo ay tiri wax jira ma aha quraafaad ku jiray oo sixir ku jiray oo waxyaabo aan diinta Islaamku aaminsanayn bey wateen, markaa waxii ay wateen baa diinta Islaamku la dagaalantay, marka dadkii Islaamka ahaabaa la dagaalamay, laakiin waxay noqotay caado, caado jirta ayey noqotay, caado jirta ayey noqotayoo meeshay markii hore diin ka ahayd bey caado noqotay, caado jirta ayey noqotayooo meeshay markii hore diin ka ahayd bey caado tagtay marka waxaa la yiri 'Kulli qaddiisi' waz kasta oo la rumaysan yahay mar bey diin nimadu ay dhaafaan oo masabkoodi waayaan, masabka xiga ayey tagaan, masabka xigana wuxuu noqdaa caado ama dhaqan iyo hidduu noqdaa; marka caday noqotay, sidaas ayey ku caadowday, diintaan la yiraahdo ee Yibirka uu ku caadoobey. Haddaba Yibirka caadooyinka lagu yaqaannaa wuxuu yahay oo ka mid ah caadooyinkiisa gabadhu haddii ay wiil dhaasho, hadday wiil dhasho wuu immanayaa wiilkaas wuxuu u keenayaa makaraan geed la yiraahdo, waa xirsi yar oo qori ku jiroo oo wax aynaan aqoon ah yar oo laf baa ku jirta; waxay Soomaalidu dhahdaa lafta xiidka weeye, xiidka geedka la yiraahdo laftiisa ayey guryaha u gelshaan, wuuna tolan yahay, makaraankaasuu dhiibayaa waana gabyayaa waxbuuna akhriyayaa, marka markuu reerka u yimaado wuu is … wuu istaagayaayoo wuu gabyayaa, gabay buu akhriyayaa, gabaygy wey qariyaan oo lama garan karo, dadka wey khaldaan oo aad bey u khaldaanoo waa waxay ku shaqaystaanoo inan laga baran ayey ku dadaalaan laakiin anigu waxaan dhegeystay anoo yar oo waxaan ka dhegeystay mid akhriyaysa ee gabyaysa ama heesaysa oo haween ah; waxay tiri gabar aroos ah bey u timid, gababddii arooska ahayd bey waxay weydiidatay oo waxay tiri sanamyo ha la siiyo, ninkii aroosay baa wuxuu yiri, wa samanyo samanyadaasu caado been ah weeye; waa eryayoo wuxuu yiri naagta iga hor dhaqaajiya, markaasay istaagtay, markaasay waxay tiri:

Rushle, rashle raangarle
Reer guur magaaro
Habaru ma kacsi tiri
Rabbi kaama beero" waxay kaloo tiri:

Shantii gabdhood ee fandhaalka deegaaneed haystay Rabbi kaama

beero. Intaasaan ka qabtay, waan ku dedaalay in aan qabto, laakiin goortay intaa tiri ayaa ninkii soo baxayayoo yiri war naagta naga dhaqaajiya oo naga aamusiiya yey nagu qaylinine… oo lagu qayliyay, ninkii wuu aamusiiyay naagtii waa la aamusiiyay.
Marka gabayadooda lama qaban karo; laakiin waxaa cad inay gabayadaa erayada ku jira ay adag yihiin ee matalam; rushle, haddaynu rushtaa u fiirsanno ninka caadiga oo maqlaa waa ku adagtahay marka halkaa waxaad ka arkaysaa inuu af hore hore uu yahay oo aad u raagay inuu yahay, rushle, qofka caadiga ah wax uu garan karo maaha, macnaa rush waa fadhi xun oo aad hoos u fadhiisato, rush! Yacnii kufid oo yar weeye, laakiin nin waliba ma yaqaan, nin waliba eray uu yaqaan maaha. Raangarle! Raan waxaa la yiraahdaa timuhu markay isku dhegdhegaaniin oo gabdhaha foodaha leh iyo raamey leedahay, garkana gar bey ku sheegtay, raangarle bey ku sheegtay, marka raangarle waxaa weeye qof liita oo baali ahoo dabbaal dabbaal ahoo liita oo nacas ahoo aan is dhiqin oo aan timaha shangleysan oo liita Rabbi kaama… wiil nacas ah macnaa yey u jeeddaa, raangarlaha wiil nacasa Alla kaama beero. Habaru ma kacsi tiri, macnaa wiil bohona, oo macnaha aan habar kacsi bi'iin karin; ma aqaan eraygaa waxay ula jeeddo, macnaa halkaasna waxaad ka garan kartaa wuxu inay wax diinka ka horreeya yihiin. Haa ninaan wax dhabayninoo raganimo lahayn Alla kaama beero ayey u jeedda baaba' u ah, habaru ma kacsi tire, markaa habar bey qabsatay inkastoo culimada qaarkod diiddan yihiin, habruhu inay ka khatarsanyihiin gabdhaha yaryar la kiin iyagu say u doorteen ma aqaan, tijaabadooda baaritaan bey u baahan tahay, ma ankiri karno annagu ma oran karno waa been bey sheegeen, laakiin waxay ujeeddadu u danleedahay nin bohonna oo liita gabar y hay Alla kaama beero. Rushle rashle, reer huura ma gaare; waa mid curyaan ah Alla kaama beero, waxaan soconn karin oo hilib ah oo aan dhaqdhaqaaqi karin Alla kaama beero, rushle, rashle, reer guura ma gaare, habaru ma kacsi tire Alla kaama beero. Allaha wey wada ictiraafsan yihiin oo iyaguna diin bey ahaayeenoo diin bey ka timid waa teyny niri diinbey ahaayeen oo wuxu inay diin tahay waa iska muuqataa. Waxaa jira shantii gabdhoodoo fandhaalka deegaaneed haystay; Shantii gabdhood; macnaha Soomaalidu waxay tiraahdaa ninkii shan gabdhood ninkii dhala jannada xisaab la'aan buu tagaa bey yiraahdaan marka waxaa waaye shan gabdhood ninkii dhala oo koriya aan ka caban janada xisaab la'aan buu tagaa bey Soomaalidu dhahdaa, marka waa dhaqan horay u jiray iyaguna wey aaminsanaayeen, oo waxay yiraahdeen gabdhaha badani oo ninkii gabdha dhala illow ninkaa gabdho dhalaa dhulku waa dhul dabeecad adag oo saxaeaa u dhow oo shaqada laga qabtaa adag tahay oo reer guuraa ah oo geel la dhaqayaa oo shaqada la qabanayaa ay geel tahay oo geelu waraabin u baahan yahay, oo oodid u baahan yahay la kala dhacaayo oo geeluba uu ku dhisan yahay dhac hadba ninkii xoog lihi qaadanaayo; markaa ninkaan wiilal dhalin wuu gablamayoo geeliisa wax celiya heli maayo, wax geeli la dhacay soo celiyana heli maayo, wax shubana heli maayo, wax xero geeyana heli maayo, wax geelii la dhacay soo celiyana heli maayo, sidaa awgeed ayey waxay gabdhha aalaaba neceb yihiin necbaayeen dadkaa reer guuraaga ah dabeecadda ayaana bartay in gabadhu wiilka ka dabeecaddaa ay ku noolaayeen iyo dhaqankaa ay ku noolaayeen in wiilku gabadha ka faa'iido badnaa,

maxaa jira wiilka markii xoolaha la dhaco, waa ka daba tagayey wuu raacdeynayey wuu soo celinayey, laakiin gabadhu ma dhicin karin, gabadhu ma soo ceshan karin oo wey ku aaadkeyd; dabeecaddaas wey ku adkeyd, marka sidaas awgeed baa gabadha wiilka looga jeclaa, dabeecaddaana abuuraysa, marka looma yaabi karo oo wey khaldanaayeen lama oran karo oo wiilkuse dad baa kula soo bood booda oo meelaha makarafoonada iyo raadiyaahsa markay ka hadlayaaniin war Soomaalida gabdhihii hore wey xaqiri jirtay! War ma xaqiri jirine waxaan dabeecaddaa abuuratay, dabeecadda ayaa abuurtay.

Marka halkaas waxaan u baahanahay wixii dhaqankii hore oo wax bay ku ahaayeen, dhaaqanka deegaaneed haysaty, marka erayga deegaanka la yiraah, dee nin waliba eray uu fahmi karo maaha, marka wuxu wax horay in ay yihiin weyny arkaynaa, gabdhihii fahannay, oo garanay gabdhihii, laakiin shantii gabdhoodoo fandhaalka deegaaneed haysta, machnaha waxay ula jeedaanshantii gabdhoodoo fandhaalka fakhri haysta, maxaa jira ninkii gabdho badan dhala, xoolo wax u dhaqa heli maayo, xoolihiisu waa dayacan yihiin bey u waddaa iyadu. Marka gabadhaan la aroosayey, ee Alla kaama beero shan gabdhood kaama beero oo wiilalna dhal, gabdhana dhal bey leedahay oo gabdho keliya ha dhalin, ayeey leedahay.

Marka horta dhaqankooda dhaqankaa yaabka leh weeye, ee wuxuna wax diini ah weeye, wuxu ma aha wax caado xun ah ma aha, dadkaa ku dhaqnaana dad liita ma aha dadkaasu waa dad ilbaxnimo wata inay ilbaxnimo waxa ay wataan yihiinna ku adkaansha ay ku adag yihiin caadadooda iyo qarsashada ay qarsaanayaan iyo u bareerridda ay u bareerayaan oo ay u adkeysanayaan iyo u bareerridda ay u bareerayaan oo ay u adkeysanayaan dadka kale goortay xaqiraan oo caayaan oo wax waliba laga sheegay matalan dadka wax ka sheegayaa oo kaleeto ka soo horjeedaana waa dadka diinta Islaamka haysta, ileyn wixii waa laba diimeedoo dirirayaan diindiin la dirireysa weeye, marka dadka diinta Islaamka rumaysan oo dhab ahaan u rumaysan ayaa cadaadiyay oo diinta la cadaadiyay ayaa waxaa la mooday in ay yihiin dadkaasu dad xun oo dadka ka dambeeya ee imbeeshe ma xuma kamana danbeeyaaniin wixii diintoodii iyo dhaqankoodii iyo ilabaxnimadoodii ayey ku adagyihiin; wey heystaan wey ku magaciisiyeeyaan, laakiin waxaa fiicnaan laha inay sheegaaniin wax yaabaha ay ku gabyayaan, heesahooda dhaqan hoosaadkooda inay sheegaan ayey ku fiicnaan lahayd, sidaa aawadeed ayaan waxaan anigu inta aan xasuusnahay intaa weeye. Waxyaabaha ay ku dhaqmayaaniin waxaa ka mid ah usha tan kor loo rido oo madaxa mar saaroo sidii sixir uu … dadka; waxaa ka mid ah makaraankan yarka ah ow sito, makaraankaan geedka yarka ah ee ilmaha uu u dhiibo waxaa ka mid ah caadadooda ay leeyihiin oo iyaga ay leeyihiin, dadka wuu u qaybsan yahay, koo waxaa la yiraahdaa hor mar eray la yiraahdo ayey leeyihiin. Hormar waxaa weeye, waxaa la yiraahdaa; wiil baa aniga ii dhashay markaasaa nin Yibiri ii yimid, yibirka markuu ii yimi ayuu makaraan I siiyay, hadduu Yibir dambeeto ii yimaado, yibirkii dambeeto makaraankii baan tusayaa iaga qaadan maayo waa lay hormaray baan leeyahay, eraygaas waa termeesiyo ay leeyihiin, hormar ayey leeyihiin. Wax la yiraahdo foodsaar ayaa jira eray la yiraahdo oo ku dhaqmaaniin, foodsaar waxaa waaye; naag baa uur lahayd, marka uurka markey lahayd ayaa laga wardoonayaa, cid baa loo dirayaa, marka

markaa la aadayo oo lagu soo kormeerayaa, marka aadistaas la aadayo, waan soo foodsaarayaa, mar mar wuu ku toosaa, iyagii oo dhashay oo sahan ah, marka erayga uu isagu yiri waa… … … heblaan meel halkaasaan soo foodsaarayaa, sahankii ma aha, erayga sahan waa iska sahan, laakiin sahan uu isagu si fiican ugu dhagmo; amuu foodsaarku waa sahan ahaaba, amuu foodsaarku waa foodsaarayaa ayuu leeyahay, yacni waa ologayaaye waan u tagayaa, olog waxaa la yiraahdaa ama erayga ollog waa soo ologayaa ayey yiraahdaan, ereyada ollogaas iyo foodsaarkaas iyo waxyaabahaas waa erayada ay ku dhaqmaan. Waxaa kaleeto oo jira ee ninbaa wuxuu ka qaddan jiray reer Cali samanyo ka qaadan jiray, marka isagoo samanyadii ka qaata baa reerkii guuray oo meel kale degay, reer Cali markey meel kale tageen aayaa waxay ku dhawaadeen yibir kaleeto ayey ku dhawaadeen, markaa yibirka kaleeto wuu u tagayaa wuu waraysanayaa, horteed buu gaaf wareegayaa, wuu gabyayaa, wuu heesayaa, markuu heeso waa loo tagayaa, waxaa la siinayaa wax la yiraahdo afur, cunadaa waxaa la yiraahdaa afur, markii afur loo geeyo yaa loo warramayaa; hadday reerku yibir leeyihii caruurtii horena samayo ka qaadan jiray waa loo sheegayaa, waxaa la oranayaa annaga yibir hebel yaa noo yibir ah oo annagu waa nala hormaray oo waa lagaa soo hormaray, waa loo sheegayaa oo waxaa la leeyahay nin hebel la yiraahdo ayaa annaga yibir noo ahoo noo immanayoo, caruurtayada weligiiba ka qaadan jiray oo makaraanaduu horay u bixiyayna waa kuwaan, hadda waa loo warramayaa asagana affur baa la siinayaa wuu iska tagayaa, wuu tagayaa. Hadday reeruhu au yihiin reero markii horreeto aan samayo laga qaadan jirin oo yibiro hore jiri jirin oo bacran ah oo cusub, hadday yihiin, oo wuxuu oranayaa makaraanadiina keena makaraanadii baa la tusayaa; makaraanadii haddii la hayo waa la tusayaa, haddii aan la hayna wuxuu oranayaa i siiya, waana la siinayaa, markaasaa samanyihii la siinayaa. Mar mar Soomaalida qaarkeed waa diidaan, maya! Yacnii ilmaha dhashay waxaa weeye goortuu qaadanayo aan is weydiino? Waa kow.

Gabadha curadda ahna waa la siinayaa, reero hadday gabadh u dhalato oo ay gabadhu curad tahay, gabadha curadda ah waa laga bixinayaa waa laga siiyaa waa kow. Wiil oo dhanna waa laga siiyaa, waa laba; waxaa kaleeto oo la siiyaa marka saddexaadna wuxuu yahay, gabadhu goortii la aroosayo, gabadha arooska ah, gabadha ugub, gabadha ugub ma aha gabadh walba, garoobta maya, garoob kama qaadanayo, garoobta waa u tagayaa afur baa la siinayaa bes, laakiin samanyo la siin maayo. Samanyaha waxaa lagu bixiyaa, saddexaa jeer baa la bixiyaa anigu kolleyba inta aan ka warqabo, waa kow.

Wiilka, wiil oo dhan waa la siinayaa, gabadha curadda ahna waa la siinayaa, gabadha arooska ah oo ugub oo arooska ag gabadha la aroosayona, saddexdaa jeerna waa la siinayaa. Wixii kaleeto oo guur ah waxaa la siinayaa afur, weyska taganiinoo weyska qosqoslaaniin; meelahaasey joogaan. Maxay dadku aaminsan yihiin, waxay aaminsan yihiin haddaan ninkaa samanyaha la siin, hadday gabar tahay, ee hadduu wiil yahay wiilkii wuxuu noqonaynaa wiil yibir qaatay, wiil yibir qaatay wiilkaas wuxuu noqonayaa taleel-nacas buu noqonayaa, ayuu noqonayaa, wiilkas wuxuu noqonayaa nacas doqona ayuu noqonayaa, wuxuu noqonayaa wax maahsan oo liita ayey u aaminsanyihiin, ma naqaan wax ka jira iyo wax ka been ah. Gabar hadday tahay oo gabar

curad ahna, gabadhii saasay noqonaysaa hadday aroos tahayna gabadhaasu samanyo ku dhacaya oo waxaa ku dhacaya gabadhaasi ilmaha waa ka xumaanayaanoo ilmuhu waa ka soo daadanayaanoo ama wax nacas ah yey dhalaysaayoo ama ilmuhu wey ka dhimanayaan ayaa la yiri, saas bey dadku aaminsanyihiin. Waxaa jirta duco ayaa jirta, ducadaas maxay tahay, ducadaas waxaa la yiraahdaa: shimbiri kugu xaaraty, raadkaaga yibir qaad, maalaa'igii kuuma xiirto, habaarada habaarka ugu daran raadkaaga yibir qaad weeye. Soomaalida agteeda yibir ku qaad, yibir kula tag, waa wax yibir qaatay, waxaas oo dhan waxay u yihiin Soomaalida habaar kii ugu dambeeyay oo lagu baaba'ay, habaar dhimman ma leh, oo naga tag wuxu waa wax yibir qaataye, marka yibirka waxay u arkayaaniin haddii aan samanyaha laga bixin in wax burhaani ka soo duulayaanoo, wixii uu inkaarayaa, wixiina ay inkaar noqonayaaniin oo qofkii samanayaha u diiday inkaari ku dhacaysaa ayey u arkayaan, saasay u arkayaan marka wax ka jira iyo wax ka beena ma naqaan laakiin waa dhaqan noocaas ah, waa wax aynu innaga soo guurinay, waa waxaynu innaga aragnay, waana an ku dheeraadaye warkii iga raali ahaada.

C. Mudiir

Haddaynu soo koobno dhaqankaa dadka aynu u naqaanno Yibraha, waxaad mooddaa inay yihiin dad yaraa, aqlabiyad yar oo aan badnayn hadda, lagase yaabo inay jiri jireen sidii Axmed Nuur u sheegay oo ka ilbaxnimo duqowday iyo dad horoo jiri jiray in ay yihiin hasa yeeshee haddii aynu soo koobno dhaqankaan waa dhaqan takooran oon la jeclayn, cabsid laga cabsanaayo iyo sida dadku u haddiidaayaan iyo sida wax laysaga siinaayo iyo waxyaalkaas ayaad ka garanaysaa.

Gobolada tan koonfur waxaa laga yaabaa inayna sidaas raad saas ihi, yibir ku qaaya iyo, caado qaatayahay iyo yibir qaataahan iyo, waxaad mooddaa gobollad koonfur inayan hadaladaasu ku badnayn, haddii wax yimaadeenna xaggan dhaqanku weys dhex gelayaaye gobolada waqooyi iyo bari iyo inay ka yimaadeen baad moodda, si kastaaba ha noqoto dhaqammadu weys dhexgelaayaan, ilbaxnimadu weys dhexgelaysaa, ilbaxnimooyinkii ummadiihi hore waa isu gudbayaan sabado mawduuci… … .. waysugu gudbaayaan, weys dhexgelayaan. Haseyeeshaa waxan la yiraahdo xikaayaadka ama qisooyinka sheekooyinka quraafaadka erayada ... ma aragtay dadka looga qosliyo oo iyagu macne gaar ah leh oo ka duwan, wax yaalkaas oo dhan ummad kastaa wey leedahay tafsiiro gaar ah ayeey u leedahay. Hasa yeeshee haddaynu ku soo noqonno duulka kan la yiraahdo yibirradu hadda wax raad ahoo weyn oo muuqda oo koraaaya ay leeyihiin mujtamacayna kuma jiro, wax yaalo baqaayaad ahoo yar yar ee casidaas aynu soo sheegnay ka mid ah iyo dad koodoo aan badnayn oo aad u yar oo aad mooddo haddii la wareego la wareego la wareegaba dadkaanu waa inay yihiin dad… … ahoo aad u yar ayaad arkaysaa, markaa si kastaba ha noqotee ee meeshaas in aynu ku sinno kifaaya ayey nagu tahay. Waadna mahadsantihiin.